

## Waxbarashada gaarka ah

Madoonaysaa iminka in ay wax kuu bilaabmaan?

Ma u baahantahay in aad heshid waxbarasho adiga gaar laguugu qorsheeyey ?

Madoonaysaa in aad la dhigatid arday aan tiradoodu badneen?

Madoonaysaa in aad ku sameeysid tababar aqoon xirfadeed ah goobaha shaqooyinka?

Madoonaysaa in aad kadib bilaawdid dugsisare oo cad ah?

Haddaba waxbarashadan gaarka ah waa mid adiga ku gu haboon.

Haddii aad dhigatid waxbarashadan gaar ka ah, kaas oo waliba adiga gaar loogu qorsheendoono, waxa markaa aad natiijooyin fiican aad kagaadhidoota maadooyinka aad u baahantahay in aad wax barashadaad aad ku sii wadatid, kuwaas oo aad markaa takhasusyada aad dooneysid ama aad rabtid aad ku gelikartid, kuna dhigankartid.

Waxbarashadan gaarka ahi casharadeedu waxa ay lamid yihiin sida wax barashooyinka kale ee lagu dhigto dugsiyada sare ee aad adiguba aad dooranlaheyd haddii aad jeclaatid, waxaa suurto gal noqonkarta in aad casharo qaar kood aad ladhigatid ardayda kale ee dhigata waxbarashoonka kale ee dugsigasare .Ama waxaa laga yaabaa in aad u baahantahay in aad heshid waxbarasho kale oo nidaam iyo degenaasho wanaagsan leh, islamarkaana uu kugu dhasho xiiso iyo jaceel waxbarasho heshidna habka kuugu wanaagsan ee waxbarasho.

## In aad shaqeysid ama aad waxbarashadaada aad siiwadatid.

Marka aad waxbarashadan gaarka ah aad dhiganeysid waxaad sameendoonta waxbarsho iyo tababaro xirfadeed wadasocda, adigoo markaa ku sameendoona goobo debeda ah ee iskuulka kabaxsan, oo meelaha shaqooyinka lag qabta ah, halkaasna waxa aad kabarandoontaa xirfadooyin. Waxaana markaa suurto galnoqonkarta in aad shaqo aad ka heshid shirkadahas aad tababar xirfadeedka aad ku sameenaysid kadib marka aad dugsiga sare aad kabaxdid.

Haddii aad dooneysid in aad waxbarashadaada sii wadatid kadib mark aad waxbarashada dugsigasare aad dhameysid, waxa ugu horeen aad marka hore samaynaysaa waa in aad doorataa waxbarasho dugsi sare ah, oo kuusahlikarta in aad siiwadan kartid waxbarashadaada kadib marka aad ka qalinjabisid wax barashada dugsiga sare.

## **Shaqooyinka aad helikareysid.**

Way adagtahay in iminka laga faaloodo ama lasaadaaliyo shaqooyinka aad helikareysid kadib marka aad ka baxdid waxbarashadan gaarka ah, waxa ay kuxidhantahay hadba waxbarashadaado waxa aytahay, ama aad baratay ama ayka koobantahay.

Haddii aad iminka aad ogtahay shaqooyinka aad musqabalka aad dooneysid in aad kashaqeytid, ama aad heshid, waxa aad weydiinkareysaa ama aad kala tashankartaa qofka xogogaalka u ah waxabarashooyinka iyo xirfadaha dugsiyada( studie och yrkesvägledare) waxaana lagaa caawindoon waxbarashada iyo casharada waxbarashadeed ee aad u baa hantahay ee ah in aad dhigatid.

## **Xiidhiika suuqa shaqada**

Waxbarashada gaarka ahi waxaad helidoontaa fursad aad u weeyn oo ah in aad tababaro xirfadeed aad ku sameysid goobaha ama meelaha shaqooyinka lagafuliyo, tababaradaasuna waxay noqonkaraan mid mudo maalin ama maalmo badan ama isbuucyoba ah. Meesha ay noqondoonto iyo inta ay le-ekaandoonto waxa ay ku xidhantahay hadba waxa aad u baahantahay, iyo wax uu yahay hadafkaagu.

Magaalooyinka qaarkood waxaad isla wadikaraysaa waxbarashadaada iyo shaqo, adigoo markaa kashaqeynaya goobooyin ka shaqooyinka laga qabto, halkaasna waxa aad ka barandoontaa xirfad. Waxaana loogu magacdaraa tababar xirfadeed. Waxa aad kala tashankartaa qofka xogogaalka u ah waxabarashooyinka iyo xirfadaha( studie och yrkesvägledare). Haddii markaa dagmada aad degentahay ay kuu helikaraan goobahaas tababarka shaqooyinka ah.

## **Mustaqbalka iyo shaqooyinka.**

Maadaam ay waxbarashadani ay noqotay mid adiga gaar laguugu qoondeeyey ama kuu gaar ah, markaas way adagtahay in lasaadaliyo in aad shaqo sifudud ama si sahal ah aad kuheshid shaqo kadib marka waxbarashadu ay kuu dhamaato.

Waxaad weydiin kartaa oo aad kalatashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada( studie och yrkesvägledare) haddii ay jiraan shaqooyin farabadan oo xirfadaas aad xiiseynaysid in aad baratid. Waxaad kaloo aad raadisaa, oo aad ogaataa shaqooyinka kaladuwan waxbarashooyinka loomaro ama aqoonta iyo cilmiga loobarto.